

# Xogwaranka ku saabsan isticmaalxumida daawaayinka taqtarku qoro

## Ku waalidiinta

Isticmaalka daawooyinka taqtarku qoro – sida daawada xanuun dilaha ah, daawada cabsida yaraya, daawada hirdada amaba mida ADHD-medicin – ee mararka qaar loo isticmaalo waxyabaha lagu saqraamo, waa dhibaato waayahaan soo korortay, waxyelo badana uleh dhalinyarada.

Waxaan rabnaa inaan idinku wargelino in hayashada daawooyinkaan iyo isticmaalkooduba yahay dembi. Isticmaalka daawooyinkaan waxaa ka dhalan kara xaaldo caafimaad oo fiicnayn iyo xaalad bulsho oo ay qofkaan dhalinyaradaa iyo dadka ku xeeranba ukeento.

Daawada sida opioider (fx smertemedicin Tramadol/Dolol) og benzodiazepiner (sida daawada hirdad iyo cabsida) waxeey kuu keeni kartaa waxyeelo aan kaa dhamaan muddo dheer, taasoo macnaheedu yahay in qofkaan dhalinyaradaa xasuustiisa, wax ku nagaanshahiisa iyo awoodisa waxbarashaba wax iska bedelaan saacado badan markiiba.

Isticmaalka daawadaan oo laga badabadiyana iyo in waxyabo kaleeto lagu sii daro sida (kaniiniyaal kale, alkohol iwm.) waxaa ka dhalan kara cawaqib xun, maadaama aaladahaan laysku qasay ay yeelan karaan awooda nuxusinta neerfaaga ilaa xad aad uwayn, kama dambeeystiina aad hawo qaashadiiba joojiso.

Waa muhiim inaad firo gaara uyeelato calaamadaha jireed iyo mid dhimirba oo aad dhihi karto, Waxaa lala xiriir karraa isticmaalxumida daawooyinkaan sida leentonimo ama xayinimo xad dhaafa, qofkoo tartara (abstinenssymptomer) iwm. Ilahay ka bari in cunugaagu uusan baran isticmaalka daawo aan asaga loo qorin.

Cunugaaga kala hadal waxa ka dhalan kara qaashada daawo aan asaga loo qorin iyo dhanka sharciga waxa kala soo gudboonaan kara hadii lagu qabto asagoo iibinaya ama gadanaaya daawooyinkaas sharcidarrada ah.

## Waa sharci darro soo gadashada iyo iska iibinba

- Daawo (aan taqtar qorin) in wadanka si sharci darro ah lagu soo gelijo, kadibna ciyaalka iyo dhalinyarada la siiyo (sida xashiishka iyo maandooriyaasha kaleba).
- Soo gelinta daawadaan, gadashadeeda iyo iska iibinta daawooyinka sharcidarrada ah waa wax ciqaab dembi lagu mutaysto.
- Ogaal ma uleedahay meelo lagu gado waxyabahaan sharci darrada ah ama maandooriyaaha ah, markaas waxaad lasoo xiriiri kartaa booliis lambarka 114.

# Qabatimidda daawo ama maandooriyaaha

Isticmaalxumo aad si aan fiicnayn u isticmaasho daawo waa wax aad qatar u ah, aadna qabatimi karto xitaa hadaad muddo yar oo kooban isticmaasho.

Jirkaagu isla markiiba waa la qabsanaaya isticmaalka daawooyinka opioider og benzodiazepiner.

Taas macnaheedu waxa uu yahay, inaad marba marka ka dambeeyasa aad xajmiga daawada sii badinayso si aad ugaarto xajmiga istiinka aad ubaahan tahay. Marba marka ka dambeeyana isticmaalkaagu oow si tartiiba usii kordhaayo, ilaa inta aad ka gaarayso xajmi daawo oo aad uwayn oo joogto kuu noqda, xajmigaas aadka uwayn ee aad qaadanayso, waxaa laga yaabaa inoow dili karo qof isticmaalka daawadaan biloow ku ah oo aan jirkiisu daawada baran.

Markaad muddo dheer isticmaasho waxyalahaan, waxaa kugu adkaan doonta inaad joojiso, waxaadna gaari kartaa xad jirkaagu abuuro calaamado oow ubaahanaayo waxyalahaas hadii aad jooji istiraa sida inaad cabsi kugu dhalato, deganaansho la'aan, hurdo la'aan ama jirkaaga oo dubaaxiya. Sidaas darteed hadii aad ka bax istiraa waxyalahaan weligaa hal mar ha joojin isticmaalka waxyalahaan, taqtarkaaga kala tasho sidii aad talaabo talaabo ugu yarayn laheyd isticmaalka waxyalahaan.

## Kaalmo ma ubaahan tahay

Waxaad xog dheeraada ka aqrisan kartaa kuna saabsan daawooyinka aan kor ku sheegnay ee taqtar qoro iyo maandooriye kaleba qoraalkaan **Rundt om rusmidler – iyo weliba talo waalid siinna**

Waxaad ka aqrisan kartaa bogga internetka [Altomstoffer.dk](http://Altomstoffer.dk)

Ma rabtaa talo iyo tusaaleeynba la xiriir Ungekontakten **tlf. 89 40 52 00**

La xiriir kalkalisada caafimaad ee cunugaaga iskoolkiisa joogta ama taqtarkaaga-ba, si lagaaga kaalmeeyo sidii suntaan jirkaaga looga saari lahaa.for at få hjælp til afvænning.

Aqriso qoraalkaan  
**"Rundt om rusmidler"**



Fiiro filimkaan ku saabsan opioider  
**"Afhængighedsfælden"**



Udarbejdet af:

Pædagogik, Undervisning og Fritid, Børn og Unge, Aarhus kommune

Ungecenteret, Sociale Forhold og Beskæftigelse, Aarhus Kommune

Østjylland Politi

April 2024

